Independence House
Voice of law & freedom

# FAALLO SHARCI

## SOCDAALKA SOOMAALIYA (SHARCI LR. 006): FURSADAHA, DALDALOOLLADA, CAQABADAHA IYO MUSTAQBALKA MAAMULKA SOCDAALKA DALKA, IYO SOOJEEDIN

READ MORE

20 MAY 2026

INDEPENDENCE HOUSE
KM4, HODON, MOGADISHU, SOMALIA.
TEL: +252 615822304
EMAIL: INFO@INDEPENDENCEHOUSE.SO

# Table of Content

## Topics

**Hordhac** ........ 1
**Baahida loo Qabo Sharciga Socdaalka** ........ 2
**Qodobbada Waaweyn ee Sharciga** ........ 3
**Saamaynta Sharciga Socdaalka** ........ 4
  **Saamaynta Dhaqaalaha iyo Maalgashiga** ........ 4
  **Xuquuqda Muwaaddinka iyo Amniga** ........ 5
  **Ku Biirista Bulshada Bariga Afrika (EAC)** ........ 5
**Gunaanad** ........ 7

# Hordhac

Sharciga socdaalku wuxuu ka mid yahay sharciyada ugu muhiimsan maamulka xuduudaha, ilaalinta amniga, horumarinta dhaqaalaha, iyo xoojinta xiriirka ay Soomaaliya la leedahay gobolka iyo caalamka. Sharciyada socdaalku kaliya saameyn kuma laha dadka socdaalaya ee galaya ama ka baxaya dal, waxayse saameyn togan iyo mid tabanba ku yeeshaan ganacsiga, maalgashiga, shaqada, waxbarashada, xuquuqda aadanaha, iyo xasilloonida guud ee dowladaha.

Soomaaliya, oo muddo dheer la tacaalaysay caqabado amni iyo kuwo dhismahooda dowladnimo, waxay ku guda jirtaa dib-u-dhiska hay'adaheeda rasmiga ah iyo dib-u-soo-noolaynta kaalinteeda caalamiga ah. Bishii Maarso ee sannadkii 2023, dalku wuxuu ansixiyey sharci socdaal oo cusub, kaas oo meesha ka saaray ku-tiirsanaantii sharcigii socdaalka ee sannadkii 1966 iyo xeerarkii ka horreeyey 1991, kuwaas oo aan si buuxda ula jaanqaadi karin duruufaha iyo baahiyaha sharciga ee maanta jira. Sharciga Socdaalka Soomaaliya (Sharci Lr. 006) oo ka kooban 9 cutub iyo 58 qodob ayaa hagaya nidaamka socdaalka dalka.

Ansixinta sharcigan ayaa ku soo beegmaysa xilli Soomaaliya ay si rasmi ah ugu biirtay Bulshada Bariga Afrika (EAC), iyadoo dhanka kalena ay dowladda dhexe waddo dib-u-dhiska hay'adaha, iyo ballaarinta xiriirrada ganacsi, dhaqaale, iyo siyaasadeed ee ay la leedahay caalamka.

Sharcigani ma ahan oo kaliya nidaam farsamo oo maareeya fiisooyinka, dalku-galka, ama arrimaha xuduudaha. Wuxuu qayb mug leh ka qaataa nidaaminta awoodaha hay'adaha dowladda, wuxuuna saameyn toos ah ku leeyahay ilaalinta xaqa socdaalka, xorriyadda dhaqdhaqaaqa ee muwaaddinka, iyo fududeynta iskaashiga socdaal ee dalku la leeyahay dunida inteeda kale.

Haddaba, faalladan waxay si qoto dheer u faaqideysaa saameynta uu sharcigani ku leeyahay nolosha dadka, xorriyadda dhaqdhaqaaqa, maalgashiga, dhaqaalaha, iyo suuqyada shaqada, iyadoo dhanka kalena lagu falanqeyn doono dulduleelada muuqda ee u baahan dib-u-eegis.

## Baahida loo Qabo Sharciga Socdaalka

Nidaamka socdaalka Soomaaliya wuxuu muddo dheer ku tiirsanaa sharciyo iyo habraacyo hore loo dhisay, sidi sharcigii socdaalka (Immigration Law) ee 1966. Sharcigaas hore wuxuu la jaanqaaday nidaam dowlad-dhexe ah, oo Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga siinayay awoodda ugu sarreysa ee fulinta xeerarka socdaalka, isagoo la mid ahaa nidaamyadii dowladdii kacaanka ee aan si habboon ula jaanqaadi karin xorriyadda dhaqdhaqaaqa ee uu dammaanad-qaaday Dastuurka ku-meel-gaarka ah ee dalka.

Sidaa darteed, si loo nidaamiyo maamulka xuduudaha iyo socdaalka dadweynaha, loona helo nidaam ilaaliya xuquuqda socotada iyo muwaaddinka iyadoo la dhawrayo amniga guud, waxay Soomaaliya u baahatay sharci cusub. Ujeeddada sharcigan ayaa ah nidaaminta habraacyada khuseeya galista, bixidda, maridda, joogitaanka, iyo deggenaanshaha dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Sharcigan waxaa sidoo kale loo rabo in lagu maareeyo isbeddellada casriga ah ee socdaalka, sida kororka safarrada caalamiga ah, kobaca ganacsiga, maalgashiga, arrimaha qaxootiga iyo barakacayaasha, la-dagaallanka tahriibka, dambiyada xuduudaha, iyo guud ahaan maamulka casriga ah ee xuduudaha. Sida ku cad Qodobka 5-aad, ujeeddada sharciga ayaa ah in Hay’adda Socdaalka iyo Jinsiyaduhu ay u gudato waajibaadkeeda si waafaqsan sharciga, iyadoo dhawraysa xuquuqda uu dastuurku dammaanad-qaaday. Sharcigani wuxuu isku dheelitirayaa laba tiir oo muhiim ah: Ilaalinta amniga qaranka iyo dhawrista xuquuqda aadanaha iyo xorriyadda socdaalka.

## Qodobbada Waaweyn ee Sharciga

Laoo soo koobay, 9-ka cutub iyo 58-da qodob ee uu sharcigani ka kooban yahay waxay nidaamiyaan soo-gelista, ka-bixidda, marista, ka-shaqeysiga, deggenaanshaha, tarxiilka, iyo maareynta qaxootiga iyo magangalyo-doonka. Qodobbada ugu muhiimsan waxaa ka mid ah:

- ✓ Qodobka 6-aad: Wuxuu awoodda maamulka iyo maareynta arrimaha socdaalka si buuxda u siinayaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha Soomaaliya (HSJS), iyada oo ka fureysa bixinta fasaxa dalku-galka, deggenaanshaha, iyo marista.
- ✓ Qodobka 8-aad: Wuxuu qeexayaa faldambiyeedyada ay geli karaan saraakiisha socdaalka, sida ku-guri-galka musuqmaasaqa ama u-abaabulista socdaal sharci-darro ah dadka socotada ah iyadoo laga faa'iideysanayo awoodda rasmiga ah.
- ✓ Qodobka 9-aad: Wuxuu siinayaa sarkaalka socdaalka awoodda baarista, hakinta, iyo xayiridda qofka ama gaadiidka haddii looga shakiyo dambi ka dhan ah sharciga socdaalka.
- ✓ Qodobka 10-aad: Wuxuu ku waajibinayaa qof kasta oo safar ah inuu hortago sarkaalka socdaalka ee heeganka ku ah xuduudaha (sida garoomada diyaaradaha ama xuduudaha dhulka iyo badda) si uu ula wadaago xogtiisa socdaalka.
- ✓ Qodobbada 11 ilaa 26-aad: Waxay nidaamiyaan shuruudaha soo-gelista ajaanibta iyo muwaadiniinta, noocyada dalku-galka (sida dalxiiska, transit-ka, iyo waxbarashada), shuruudaha deggenaanshaha, iyo habraaca uu ajnabiga raba inuu ganacsi ka hirgeliyo dalka u marayo. Waxay sidoo kale qeexayaan dammaanad-qaadka laga rabo qofka ama shirkadda Soomaaliga ah ee keenaysa shaqaale ajnabi ah.
- ✓ Qodobka 27-aad iyo 28-aad: Qodobka 27-aad wuxuu xusayaa in khidmadaha lacageed ee dalku-galka iyo deggenaanshaha lagu go'aaminayo sharci baarlamaan, halka Qodobka 28-aad uu qeexayo dadka laga dhaafayo khidmadahaas iyadoo la raacayo heshiisyada caalamiga ah ee dalku ku jiro.

- ✓ Qodobka 29-aad iyo 31-aad: Qodobka 29-aad wuxuu ku waajibinayaa gaadiidka caalamiga ah ee soo galaya dalka inay hay'adda la wadaagaan liiska rakaabka, halka Qodobka 31-aad uu ciqaab dul dhigayo wakiilka ama mulkiilaha gaadiidka ee dalka soo geliya qof aan oggolaansho haysan.
- ✓ Qodobka 34-aad: Wuxuu awood u siinayaa Wasaaradda Amniga Gudaha inay xeer ku soo saarto goobaha ka reeban ajaanibta ee dalka ka mid ah.
- ✓ Qodobbada 35 ilaa 41-aad: Waxay faahfaahinayaan habraacyada shaqo-ka-joojinta, tarxiilka (musaafirinta), maareynta ajaanibta aan dalka laga rabin, iyo curaarta (dammaanad-lacageedka) laga rabo inta ay dalka ku sugan yihiin.
- ✓ Qodobka 44-aad: Wuxuu xaddidayaa safarka carruurta ka yar 18 sano, iyadoo la raacayo shuruud ah inay la socdaan waalidka ama qof maxkamadi u oggolaatay.
- ✓ Qodobbada 49 ilaa 52-aad: Waxay si gaar ah u maareeyaan arrimaha qaxootiga iyo magangalyo-doonka, iyo dhismaha guddiyada go'aanka ka gaaraya ruqsada qaxootinimo.

### Saamaynta Sharciga Socdaalka

## Saamaynta Dhaqaalaha iyo Maalgashiga

Sharcigani wuxuu waajibaadyo sharciyeed saaraya shirkadaha bixiya shaqooyinka, shaqaaleysiinta ajaanibta, deggenaanshahooda iyo u hoggaansanaanta nidaamyada socdaalka ee quseeya shirkadaha iyo dadka ajnabiga ah ee doonaya inay ka shaqeystaan ama maalgashi ka sameeyaan gudaha dalka. Maadaama socdaalku yahay il dakhli oo muhiim u ah dowladda, khidmadaha laga qaado dalku-galka iyo deggenaanshaha waxay kor u qaadayaan dakhliga gudaha.

Haddii nidaamka socdaalku noqdo mid cad, hufan, oo la saadaalin karo, wuxuu door ka qaadan karaa kor u qaadista kalsoonida maalgashadayaasha, ganacsatada iyo hay'adaha caalamiga ah ee doonaya inay Soomaaliya la macaamilaan.

### Xuquuqda Muwaaddinka iyo Amniga

Sharciga Socdaalku wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa nidaaminta isu-socodka dadka iyo hirgelinta habraacyada la xiriira gelitaanka iyo ka bixitaanka dalka, isagoo la jaanqaadaya mabaadi'da dastuuriga ah ee ilaalinta xorriyadda dhaqdhaqaaqa iyo xuquuqda aadanaha. Sidaa darteed, tayada sharciga socdaalka laguma qiimeeyo oo kaliya awoodaha uu siinayo dowladda, balse sidoo kale waxaa lagu cabiraa heerka uu u ilaalinayo xuquuqda dadka, gaar ahaan qaxootiga, magangelyo-doonka iyo dadka wajahaya habraacyada tarxiilka.

Sidaas awgeed, guusha dhabta ah ee sharciga socdaalku kuma xirna oo keliya awoodda uu u leeyahay ilaalinta amniga qaranka, balse sidoo kale waxay ku xiran tahay sida ay hay'adaha fulinaya u xaqiijiyaan in awoodahaas loo adeegsado si waafaqsan sharciga, caddaaladda iyo ixtiraamka karaamada aadanaha.

### Ku Biirista Bulshada Bariga Afrika (EAC)

Ansixinta sharcigan waxay qayb muhiim ah ka ahayd hannaanka ay Soomaaliya ugu biirtay Bulshada Bariga Afrika (EAC). Maadaama hadafka EAC uu yahay fududeynta isku-socodka xorta ah ee dadka, adeegyada iyo ganacsiga, sharcigan cusub wuxuu aasaas u yahay is-dhexgalka gobolka. Caqabadaha dhanka amniga, siyaasadda, iyo maamullada dalka ka jira awgood, fulinta sharcigan wuxuu wajhi karaa kala-dhantaalnaan, taas oo keenaysa su'aasha ah: Sidee looga guul-gaari karaa caqabadahaas si sharcigu u fuliyo ujeeddooyinkii loo unkay?

## Dulduleelada Sharciga Socdaalka

In kasta oo Sharciga Lr. 006 uu yahay tallaabo hore loo qaaday oo casriyeynaysa maamulka xuduudaha, haddana waxaa jira meelo dhowr ah oo u baahan dib-u-eegis iyo horumarin xilliyada soo socda, kuwaas oo kala ah:

1. Caddeyn La'aanta Hannaanka Dacwada ee ka Dhanka ah Saraakiisha: Qodobka 8-aad wuxuu qeexayaa dambiyada uu sarkaalka socdaalku geli karo, laakiin ma cadda habraaca uu qofka muwaaddinka ah ama socotada ahi u marayo gudbinta cabashadiisa iyo u-dacwoosgisa dowladda. Tani waxay u baahan tahay xeer-nidaamiyayaal caddeeya hannaankaas.
2. Qodobbada Isku Soo Noqnoqday: Si loogu fogaado jahwareer sharci iyo laba-fasiraad, sharcigu waa inuu ahaado mid kooban oo cad. Tusaale ahaan, Qodobka 30-aad oo sharraxaya soo-gelista ku-meel-gaarka ah wuxuu aad ugu dhow yahay nuxurka Qodobka 14-aad ee hore loogu soo sheegay.
3. Turxaan-bixinta Guddiga Qaxootiga: Qodobka 52-aad ee khuseeya Guddiga Go'aan-gaarista Qaxootiga wuxuu u baahan yahay turxaan-bixin dhinaca qaab-qoraalka iyo caddaynta luuqadda sharci. Sharciga wanaagsan waxaa lagu yaqaana inuu adeegsado erayo cad oo aan dhalin karin jahwareer ama fasiraado kala duwan. Sidaa darteed, dib-u-eegis yar oo lagu sameeyo qaabka loo qeexay xubnaha guddiga waxay xoojin kartaa hufnaanta iyo fahamka qodobkaas.
4. Dambiyada Socdaalka ee Tiknoolajiyada (Cybersecurity): Iyadoo nidaamyada socdaalka casriga ah ay si xowli ah usii kordheyso, uguna tiirsan yihiin xogaha dhijitaalka ah, aqoonsiyada elektarooniga ah iyo keydinta macluumaadka dadka safarka ah, waxaa muhiim ah in dib-u-eegisyada mustaqbalka ee sharcigu ay si gaar ah u tixgeliyaan arrimaha la xiriira amniga xogta (cybersecurity) iyo ka hortagga isticmaalka ama xatooyada xogaha socdaalka. Tani waxay xoojin kartaa kalsoonida iyo badbaadada nidaamka socdaalka ee dalka.

## Gunaanad

Sharciga Socdaalka Soomaaliya (Sharci Lr. 006) wuxuu ka mid yahay tallaabooyinka muhiimka ah ee ay Soomaaliya u qaadday dhanka casriyeynta maamulka socdaalka iyo xuduudaha. Sharcigani wuxuu si toos ah uga jawaabayaa baahiyaha dhabta ah ee la xiriira amniga, dhaqaalaha, maalgashiga, isu-socodka dadka, iyo is-dhexgalka gobolka, isagoo dowladda siinaya qaab-sharciyeed ay ku maamuli karto arrimaha socdaalka iyadoo la jaanqaadaysa duruufaha maanta jira.

Si kastaba ha ahaatee, sida sharciyo badan oo kale, muhiimadda dhabta ah ee sharcigan laguma cabbiri karo oo keliya baaxadda iyo tirada qodobbadiisa; waxaase lagu cabbiri doonaa hufnaanta loo hirgeliyo, u-diyaar-garowga hay'adaha dowladda ee fulintiisa, iyo saamaynta tooska ah ee uu ku yeesho nolosha dadka socotada ah ee maalin kasta adeegsada xuduudaha. Haddii si hufan loo fuliyo, wuxuu noqon doonaa tiirar muhiim ah oo ka mid ah dhismaha nidaam socdaal oo casri ah, ammaan ah, isla markaana taageera horumarka guud ee dalka.

Sidaa darteed, si hadafyadaas loo gaaro, waxaa lagama maarmaan ah in la ballaariyo, lagana shaqeeyo tayeynta awoodda hay'adaha socdaalka. Tani waxay u baahan tehay kordhinta iyo tababarista shaqaalaha, hirgelinta teknoolajiyada iyo nidaamyada xogta ee casriga ah, iyo in si dhow loo xoojiyo iskaashiga iyo isku-xirnaanta hay'adaha kala duwan ee ay khuseyso shaqada socdaalku.

### Ku Saabsan Qoraaga

*Mohamed Abdirizak Ahmed, waa sharci-yaqaan iyo cilmi-baare sharci oo daneeya dib-u-habaynta sharciyada, helitaanka caddaaladda iyo dhismaha hay'adaha dowliga ah ee Soomaaliya. Wuxuu wax ka qoraa arrimaha sharciga, caddaaladda iyo siyaasadda guud, isagoo diiradda saaraya sida sharcigu ugu adeegayo bulshada iyo dowladnimada.*